Xuquuqdaada daryeelka caafimaadka

La kulanka daryeelka

Hadii la kulanka shaqaalaha daryeelka aanu si wacan u shaqeynayn waxa si dhibyar u dhici kara isfahal la'aan iyo qalad. Masuuliyada daryeelku waxa lagu xadeeyaa sharciyo kala duwan. Hadaad bukaan socod tahey waxa xaq u leedahey tayo fiican, badbaado iyo aaminaad. Waxa kale oo aad xaq u leedahey la kulan fiican, ixtiraam, warbixin muhiima iyo fursada aad ku doorato.

Waxa aad xaq u leedahey warbixin aad fahanto

Taas waxa ka mid ah xaaladaada caafimaad, ogaanshaha cudurkaaga iyo saadaasha iyo baadhitaanka suurto galka- iyo habka daaweynta. Waxa kale oo aad xaq u leedahey in aad warbixin ka hesho inta la sugaaayo, saameynta iyo saameynaha imaan kara ee daawada iyo daaweynta. Hadii aad adigu aad u xanuunsantey qofkale oo qaraabo ah ayaa ilaalin doona xuquuqdaada.

Waxa aad xaq u leedahey daryeel wakhti suurto gal ah

Sida ku digan daryeelka- iyo damaanada daaweynta ee qaranka waxa aad heli doonta wakhti Booqasho iyo daawey oo xili la xadeeyay ah. Damaanada daryeelku waxa ay khuseynaysaa daryeelka la qorsheeyay, iyadoo saameynaysa dhamaan qof kasta. Hadii aad xoog u xanuusato ama dhaawacanto waxa daryeel lagu siin sida ugu dhakhsaha badan.

0 Waxa aad la xidhiidhi talobixinta daryeelka bukaanka ama rugta cafimaadka adoo telefoon u dira ama u taga doona isla maalintiiba.

7 Hadii shaqaalaha daryeelku ay u arkaan in aad u baahan tahey in aad dhakhtar la kulanto waxa aad heli booqashadaa todoba maalmood gudahood.

90 Hadii laguu gudbiyo daryeelka takhasuska ah waxa aad lagu siin wakhti kuwaas ah 90 maalmood gudahood. Taas xataa waxaa ku jira markaad isa soo gudbiso. Carruurta iyo da'yarta qaba xanuunka maskaxda waxay xaq u leeyihiin in la daaweeyo 30 maalmood gudahood.

90 Kadib marka go'aanka ku sabsan daaweyntaada la sameeyo waa in la hirgaliyo 90 maalmood gudahood. Carruurta iyo da'yarta qaba xanuunka maskaxda waxay xaq u leeyihiin in la daaweeyo 30 maalmood gudahood.

Landstinget Kronoberg

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Golaha Deegaanka Kronoberg waxaanu ka shaqeynayna sidaanu kuugu suurto galin laheyn inaad dhakhtar khaas ah u aragto dhakhso. Waa hamigayaga in lagu daaweeyo 0–7–60–60 maalmood gudahood.

Hadii ay Golaha Deegaanka Kronoberg ku siin waydo daryeel xili loo xadeeyey xiliyada ka midka ah damaanada daryeelka waxa aad haysataa fursada aad daryeel kaga heli karto meel kale, hadii aad rabto. Waxa aad bixineysaa lacagta dhakhtarka iyo kharashka qaybta intaada ee socdaalka bukaanka.

Hadii aad adigu ka raadsato daryeel ka baxsan Golaha Deegaanka Kronoberg adigaa isku qaba kharashyada aad gasho sida tusaale socdaalka iyo hoygaaga.

Hindisaha dhakhtar kale – baadhitan daaweynta oo labaad

Waxa aad marmarka qarkood xaq u leedahey aragtida/hindisaha dhakhtar kale, sida ta loo yaqaan second opinion. Taas waxa weeye micnaheedu in dhakhtar kale ku baadhi karo oo aan aheyn kii aad hore ugu tagtey. Ta caadiga ah waa in shaqaalaha daryeelku kugu diyaariyaan second opinion cusbitaalka gudihiisa ama iyagoo la xidhiidha cusbitaal kale.

Waxa aad xaq u leedahey hindisaha dhakhtar kale:
• hadii aad qabto cudur nolosha u halis ah ama cudur aad u khatar ah
• hadii daaweynta daawadu ay kuu keeni karto halis/khatar adiga
• hadii dalabkaagu uu muhiim u yahey tayada noloshaada ee mustaqbalka iyo
• hadii aanad si buuxda u cadey nooca daaweynta adiga si buuxda kuugu haboon .

Warqada gudbinta

Warqada gudbinta waxa loo baahan yahey tusaale ahaan marka dhakhtarka rugta caafimaadka u arko in aad u tagto dhakhtar takhasus ah ama daryeel kale oo takhasus ah. Waxa kale oo aad adigu toos u raadsan kartaa rugta takhasuska ee cusbitaalka adoo wata waxa loo yaqaan isgudbinta shakhsiga. Taas waxa weeye in aad qoraal ahaan u tilmaanto xaaladaada iyo sababta aad daryeelka u dalbaneyso.

Hadii aad u baahan tahey daryeel takhasusah dheer oo gaar ah leh ama baadhitaan sida tusaale raajo iyo tijaabada shaybaadhka waa in aad haysato warqad gubnita ee dhakhtarka.

Daryeelka takhasus oo gaar ah waa sida wadno xanuunka adag iyo bacriminta ugxanta ee dhalada. Hadii aad gobol kale ka raadsanayso daryeel waxa shaqeynaaya xeerarka gudbinta ee gololkaa.

Landstinget Kronoberg

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Xuquuqda turjumaanka

Maqalka- ama dhaawaca hadalka
Hadii aad qabto maqalka- ama dhaawaca hadalka ama hadii aanad ufahmeyn si wanaagsan luqada sweedhisha waxa aad xaq u leedahey turjumaan.

Ruuxa dhegaha la', ama dhegaha iyo indhahaba la' ama weynaanta ku dhagabeelay ama maqalkiisu uu hooseeyo ayaa xaq u leh turjumaan. Waxa aad xaq u leedahay in aad hesho turjumaanka faraha iyo qoraalka xaaladaha maalmaha la shaqeeyo intooda badan. Adeega turjumaanku waa lacag la'aan ah waxaana laga dalban karaa iyada oo la marayo rugta turjumaannada ee maamulka gobolka.

Luqadaha kale ee aan sweedhiska aheyn
Waxa aad xaq u leedahey turjumaanka luqada hadii aad u baahan tahey. U sheeg taa marka aad qabsaneyso wakhti booqashadaada. Shaqaalaha daryeelka ayaa ka dib kuu diyaarinaaya turjumaan ka socda xidhiidhka turjumaanada.

Xataa hadii aad haysato asxaab ama qaraabo kuu turjumaani karta, waxaa kugula talineynaa turjumaan buuxa oo maamulka gobalka ama degmadu kuu qabatey.

Telefoonka qoraalka

Markaad soo wacdo xarunta xidhiidhinta telefoonada ee maamulka gobolka ayaad dalban kartaa teefoonka qoraalka. Telefoonka qoraalka waa caawimo adiga hadalku, codka ama luqadu kugu adeg yahey.

Su'aalo

Maad su'aalo hayso ku sabsan qorsheynta daryeelkaaga iyo daaweyntaada? La xidhiidh ciyaadada soo dirtey warqada gudbinta ama xaqiijinta, ama dhakhtarka usoo direy warqada gudbinta daryeelka takhasuska laga dhigey.

Landstinget Kronoberg

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Hadii aad wax fikrado ah hayso

Hadii aad wax fikrado ah oo daryeelka aad heshay ku sabsan hayso, la hadal marka hore shaqaalaha ama maareeyaha waxqabadka ee ciyaadada aad boogatey. Waxa kale ood la xidhiidhi kartaa Gudiga bukaan socodka (Patientnämnden).
Teleofonka: 0470 58 85 42
Emaylka: patientnamnden@ltkronoberg.se